

## **5 Waxyaabood oo Waxtar leh oo la Sameeyo Marka Aad Ogaato in Aad Qabto Kansar**

### **1. Ka fikir sida aad dooneyso in aad u isticmaasho waqtigaaga iyo xoogaaga.**

- Tani waxa ay kaa gacan siinaysaa in aad samaysato dookhyo iyo qorshayaal.

### **2. Waxaada isku dubarido.**

- Haddii aad shaqeyso, ka codso waaxdaada HR nuqul ka mid ah kababkaaga.
- Hel nuqulada naafonimadaada buuxda iyo siyaasadaha caymiska caafimaadka (si gaar ah u codso siyaasadda caymiska oo buuxda, ma aha oo kaliya soo koobidda, si aad ugu diyaargarowdo arrimo kasta oo mustaqbalka ah.)
- Xafid xusuus-qorka ballan kasta oo caafimaad iyo wicitaan kasta oo ku saabsan daryeelkaaga. Qor qofka halkaas joogay, wixi laga wada-hadlay, iyo faahfaahin kasta oo muhiim ah.

### **3. Samee nidaam taageero.**

- Marka asxaabta iyo qoysku ay damcaan in ay ku caawiyaan, ha ku caawiyaan.
- Waxa ay kula imaan karaan ballamaha, sameyn karaan xusuus qor, waxayna maareyn karaan waraaqaha shaqada sida faahfaahinnada daawaynta iyo biilasha.

### **4. Waa caadi in aad caawimaad codsato marki aad su'aalo qabto.**

- Kooxdaada caafimaadka waxa ay kaa caawin karaan su'aalaha caafimaadka.
- Su'aalaha kale, kala hadal HR-kaaga ama qofka qaabilsan kababka shaqada, wakiilka ururka, shaqaale bulsho oo jooga isbitaalkaaga ama rugtaada caafimaad, ama xubin wadaad diimeed ah.
- Kaligaa ma tihid, dad badan ayaana kaa caawin kara in ay jawaabo kuu helaan.
- Shaqaalaha bulshada ee ku sugan rugtaada caafimaad ayaa ah il wanaagsan oo laga helo xogta ku saabsan kheyraadka bulshada waxayna kaa caawin karaan codsiyada deeqda lacageed.

### **5. Dadka aad jeceshahay kala hadal wixi ku saabsan rabitaanadaada.**

- Buuxi foomka dardaranka daryeelka caafimaadka si aad dookhyadaada u kala cadeyso.
- Xaqiiji in dadka aad jeceshay ay og yihiin halka ay yaalaan dukumiintiyada muhiimka ah, sida dardarankaaga daryeelka caafimaadka, dardaranka, iyo awooda qareenka.